

# Warqadda Xaqiiqooyinka ee Library Levy 2026



Maktabadda Levy 2026 waxay soo jeedinaysaa maalgelin dhan \$480 milyan si loo sii wado maalgelinta dheeraadka ah maktabadaha Seattle muddo toddobo sano ah (2027-2033).

Haddii ay ansixiyaan codbixiyeyaasha Seattle doorashada Agoosto 4, 2026, levy-ga ayaa beddeli doona Library Levy 2019 ee dhacaya, kaas oo hadda ka kooban saddex-meelood meel miisaaniyadda guud ee maktabadda dhinacyada saacadaha iyo helitaanka, ururinta agabka, dayactirka dhismayaasha, iyo tiknoolajiyada iyo adeegyada onlaynka ah.

## Immisa ayay qorshahan ku kacaysaa canshuur bixiyeyaasha Seattle?

Sida uu sheegay Xafiiska Miisaaniyadda Magaalada Seattle (Seattle's City Budget Office), heerka celceliska canshuurta sannadlaha ah ee milkiilayaasha guryaha wuxuu noqonayaa \$0.23 halkii \$1,000 ee qiimaha guriga la qiimeeyay; halka kharashka celceliska sannadlaha ah ee milkiilayaasha guryaha qiimahoodu dhexdhexaad yahay la filayo inuu noqdo qiyaastii \$193 sanadkii levy.

## Maxay maalgelin doontaa Library Levy 2026?

### Saacadaha & Helitaanka: \$229.1 milyan

- Saacado furan dhammaan goobaha maktabadda
- Barnaamijyo badan oo loogu talagalay dhammaan da'da, oo ay ku jiraan barnaamijyada akhris-qoraalka hore ee luqado badan
- Kordhinta ilaha amniga iyo u-diyaargarowga xaaladaha degdegga ah
- Khubaro badan oo Kheyraadka Bulshada ah

### Dayactirka Dhismayaasha: \$134.1 milyan

- Taageero dheeraad ah oo loogu talagalay dayactirka dib loo dhigay, kan joogtada ah, iyo kan weyn, oo ay ku jiraan nidaamyada kuleylinta iyo qaboojinta, wiishashka, jaranjarooyinka korontada ku shaqeeya, iyo helitaanka Xeerka Dadka Naafada ah ee Maraykanka (Americans with Disabilities Act, ADA)
- Dib-u-habeyn dhanka dhulgariirka iyo cusboonaysiin lagu sameeyo laamaha Columbia iyo West Seattle
- Dib-u-cusboonaysiin weyn oo lagu sameeyo goobaha dadweynaha ee Maktabadda Dhexe (Central Library)
- Taageero dheeraad ah oo nadaafadeed iyo ilaalin

### Ururinta Agabka: \$69.4 milyan

- Buugaag iyo agab badan oo jireed iyo dijitaal ah, oo ay ku jiraan Peak Picks
- Sii wadista amaahashada aan ganaax lahayn

### Tiknoolajiyada & Adeegyada Onlaynka: \$38.2 milyan

- Taageero joogto ah oo loogu talagalay kombiyuutarada dadweynaha iyo shaqaalaha, adeegyada daabacaadda iyo koobiyeynta, iyo helitaanka internet-ka, oo ay ku jiraan Goobaha Wi-Fi
- Taageero dheeraad ah oo loogu talagalay kaabayaasha IT-ga, nidaamyada, iyo amniga internet-ka

### Maamulka: \$9 milyan